

MAXAA GUDNIINKA WIILASHA LOO JOOJINAYAA?



Mashruuca Dhammaanta

Buuryo faya-qabta

Buuryadu gusku ee uur-ku-jir labood waxay bilawdaa inay korto todobaad-ka 8aad ee uurka hooyo. Maqaarkan jilicsan oo leh laba lakab oo daboolka fanjarta guska waxa uu ka koobmaa dareenmayaal khaas ah, habayaal dhiig iyo jiir muruqyo ah.

Shaqada muhiimka ah ee buuryadu waa ka ilaalinta kulka iyo qabowqa, qalaylka iyo isliska fanjarta guska, doorkeeda isugalmoodkuna sidoo kale aad buu muhiim u yahay. Buuryadu waxa ay kordhisaa dareemada xasaasiyadeed (himadeed) ee guska. Habka kala bixideedu waxa uu isugalmoodka u yahay mid habsami u shaqayn leh oo raaxo u leh labada lamaane.

Waa maxay gudniin?

Gudniinka labku waxaa loo tixgeliyaa jarida qaliimeed ee qayb ama gebi ahaan buuryada (balagta) laga gooyo guska iyadoo la adeegsanayo mindi ama qalab kale. Waxaa badanaaba lagu sameeyaa wiilasha intaanay qaangaarin. Buugan waxa aan u adeegsanay erayga gudniin in aan ku tilmaano qaliin aan la xiriirin dawayn oo loo sameeyo xeer dhaqameed u gudub ninimo ama sababo diimeed.

Xilliga gudniinka wiilku wuxuu waayaa:

- In ka badan kala bar buuryada daboolaysa fanjarta guska taasoo dabeed u qaawisa fanjarta qalalid, jarid (sariin) iyo isliskaba
- Habka kala bixista balagta iyo fanjarta, oo muhiim ah oo kiciya himadda raaxda isugalmoodka labada lamaane inta galmadu socoto
- Ilaa hal mitir oo habayaash dhiiga
- 80 mitir oo dareemyaal yaryar ahna kuwo dareen nugul sida kuwa faraha caaradooda ama dibnaha(bushmaha) dareenkooda
- 10,000 – 20,000 dareen helayaal saameeya kacsiga isugalmoodka
- Unugyo dareenka oo muhiim u ah hab-difaac jirka
- Tan ugu darran waa wiilka oo waayi kara guskiisa ama naftiisa

Qaliin kasta waxaa ku jira halis. Dhibaatooyinka guud ee gudniinka waa dhiig-bax, jirka oo barara iyo qaybtaas oo madoobaata kadib marka dhiigu ka xirmo. Gudniin lagu guuldaraysto wuxuu keenaa boogow halis ah oo guska ku yimaada ilaa dhimasho wiilka la guday.

Dhibaataada joogtada ah ee gudniinku waxa ay noqon kartaa boogowga guska, kacsi la'aanta guska iyo kacdoon dareen oo uu keeno xanuunkii hore uga soo maray gudniinka.

Xiloodinta galmada iyo gudniinka

Nimanka la guday waxa ka caban karaan kacsi xanuun badan, damac (himad) la'aan, galmo iyo isugalmood xanuun badan. Sidoo kale gogol-wadaagga la guduhu waxa uu dareeni karaa xanuun inta saarashadu socoto oo ay keento kala bax la'aanta buuryada iyo dhalfada gusku, qalaylka guska ama xagtinta nabarada gudniinka.

Xuquuqda Aadmiga iyo sharciga

Dhammaan gudniinka aan dawaynta ahayn waa ku xadgudbid wadajirka jirka wiilasha, marka laga eego xuquuda aadmiga, anshaxa dawaynta iyo anshaxa xiloodinta waa hawlgal dhibaato oo la fuliyo kaasoo xadgudub ku ah ilmaha iyo jirka. Tusaale ahaan heshiiska caruurta ee xuquuqda caalami-ga (1989) waxa uu ilaalinayaa wadajirka jirka ilmaha iyo fargelin la'aanta horumareed. Finland waxa sidoo kale ay saxiixday heshiiska dawaynta bay-ologiga (2010), kaas oo mamnuucaya goynta (ama saaridda) nudo fayow iyadoon fasax laga haysan qofka.

Sababaha kor lagu xusay owgeed gudniinka wiilasha waa jirdil la mida kan gabdhaha gudistooda. Finland, waalidka waa la dacwayn karaa haddii ay u ogolaadaan carruurtooda in la gudo.

Waxa lagu Bedeli karo gudniinka

Halista iyo dhibatooyinka gudniinka iyo ku takrifalka muuqda ee xuquuqda aadmiga owgeed waxa la soo saaray hab lagu bedelo gudniinka. Gudniinka waxaa loo sameyn karaa iyadoo la adeegsado matalaad, sida jarida maro intii la jari lahaa balagta, loona daayo ilmaha inuu sidiisa u wadajiro. Mid kale oo xal suurta gal ah waa in dib loo dhigo gudniinka ilaa wiilku qaangaar ka noqdo oo awood u yeesho in uu go'aan isaga gaari karo. Haddaba, waa lama huraan inuu wiilka go'aanka gaaraa isagoo og kha-tarta iyo dhibatooyinka ka iman kara.

Wiilasha gudistoodu ee daawaynta aheyn waa ku xadgugub xuquuqda ilmaha!

Sexpo waxay bilowday 2011-kii mashruuceeda Dhammaaneed (Ehjä) kaas oo looga gol leeyahay dhimista gudniinka daawo la'aaneed ee wiilasha ee xilliga fog iyadoo la isticmaalaayo wacyigelin caafimaad. Barnaamijkan wuxuu warbixin ka bixinayaa gudniinka dhibaatooyinkiisa, waxyeeladiisa iyo anshaxa guud.

Eeva Matsuuke
Xiriiriyaha Mashruuca
Mashruuca Dhammaanta

050 372 6066
eeva.matsuuke@sexpo.fi

Buugyaran waxaa la heli karaa isagoo ah Carabi, Ingiriis, Kurdi, Faransiis, Swedish, Somali iyo Finnish.

Sexpo Foundation
Malminkatu 22 E
00100 Helsinki
010 322 9420
info@sexpo.fi

